Central Maine Healthcare

Siyaasad/Habraac: Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale (FAP)	
HAY'ADDA: **Central Maine Healthcare (CMH)** **CMH waxaa ku jira Central Maine Medical Center (CMMC), Bridgton Hospital (BH), Rumford Hospital (RH), Central Maine Medical Group (CMMG), Maine College of Health Professions, xarumaha daryeelka muddada dheer, rugaha caafimaadka iyo dhowr hay'adood oo kale oo hoos yimaada.**	**BUUGGA:** Maamulka **CUTUBKA:** Maaliyadda **TAARIIKHDA BILOWGA:** 11/29/2019 **TAARIIKHDA ANSIXINTA UGU DAMBAYSA:** 7/30/2026

FULIYAHA SIYAASADDA

Siyaasaddani waxay khusaysaa xarumaha, goobaha daryeelka, hay'adaha, adeegyada iyo xubnaha shaqaalaha Central Maine Medical Center, Bridgton Hospital iyo Rumford Hospital.

UJEEDDO

Hay'adaha Central Maine Healthcare (CMH) ee kor ku xusan, oo ay ku jiraan dhammaan xarumaha adeeg-bixiyeyaasha caafimaad ee la xiriira, waxay gargaar dhaqaale u fidiyaan bukaannada aan haysan caymis caafimaad, kuwa caymiskoodu aanu ku filnayn, ama kuwa aan awoodin inay bixiyaan kharashka daryeelka, si ay u helaan adeegyada caafimaadka degdegga ah iyo kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, ha noqdaan bukaan-jiif ama bukaan-socod. Gargaarka dhaqaale waxaa loo maamulaa si caddaalad, isku mid ah, xushmad leh oo dhexdhexaad ah; wuxuuna muhiim u yahay xaqiijinta himilada, aragtida iyo qiyamka CMH.

Siyaasaddan waxaa loogu talagalay in meesha laga saaro caqabadaha dhaqaale ee hortaagan daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, iyadoo la taageerayo ballanqaadka CMH ee ah in bukaan kasta, maalin kasta, uu helo daryeel ammaan ah, lagu kalsoonaan karo oo tayo sare leh. Siyaasaddu waxay dejinaysaa habraacyo mideysan oo lagu aqoonsado bukaannada laga yaabo inay u qalmaan, lagu maareeyo codsiyada, lagu go'aamiyo u-qalmitaanka, laguna wargeliyo dadka xulashooyinka gargaarka dhaqaale.

Siyaasaddan waxaa loo dejiyey in lagu xaqiijiyo u-hoggaansanaanta sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka ee khuseeya, oo ay ku jiraan Qodobka 501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha iyo sharciga Maine, gaar ahaan 22 M.R.S. §1716-A, oo dhaqan galay Luulyo 1, 2026. Shuruudaha ku saabsan u-qalmitaanka daryeelka samafalka, muddada maareynta codsiyada, ogeysiisyada bukaanka, ilaalinta biilasha iyo xaddidaadaha qorshayaasha lacag-bixinta ayaa lagu dhex daray Siyaasaddan oo dhan.

All official Central Maine Healthcare policies are maintained electronically and are subject to change. No printed policy should be taken as the official policy except to the extent it is consistent with the current policy that is electronically maintained.

HABRAAC/HANNAAN

I. AQOONSIGA BUKAANNADA LAGA YAABO INAY U QALMAAN

A. Marka ay suurtagal tahay, ka hor taariikhda adeegga bukaanka, CMH waxay wareysi ka hor seexinta isbitaalka la yeelan doontaa bukaanka, qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashka iyo/ama wakiilkiisa sharci. Haddii wareysigaas aanu suurtagal ahayn, waa in la qabtaa marka adeegga la bixinayo ama sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah ka dib, gaar ahaan kiisaska kharashkoodu badan yahay.

B. Haddii bukaanka loo soo geliyo xaalad degdeg ah, qiimaynta CMH ee hababka kale ee lacag-bixintu waa in aanay dhicin ilaa daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay la bixiyo. Wareysiga koowaad ee bukaanka, xogtan soo socota waa in la ururiyaa, balse ma aha inay dib u dhigto baaritaanka iyo daaweynta:

- Xogta aasaasiga ah iyo tan dhammaystiran ee aqoonsiga iyo xaaladda qofka; iyo
- Xog dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan caymisyada dhinac saddexaad ee jira

C. Dhammaan bukaannada waxaa la siin doonaa fursad ay ku codsadaan kaalmo dhaqaale. Marka bukaanku codsado kaalmo dhaqaale ka dib marka uu ka baxo xarunta, Lataliye Kaalmo Dhaqaale ayaa u diri doona bukaanka/mas'uulkiisa foomka Codsiga Kaalmada Dhaqaale si uu u buuxiyo.

D. Bukaannada laga yaabo inay u qalmaan waxaa la aqoonsan karaa wakhti kasta oo ka mid ah Muddada Codsiga.

E. La-taliyeyaasha kaalmada dhaqaale badanaa waa la heli karaa saacadaha shaqada ee caadiga ah si ay u bixiyaan adeegyada soo socda:

- Aqoonsiga ilaha suurtagalka ah ee lacag-bixinta, sida caymiska mas'uuliyadda shilalka ama COBRA
- Baaritaanka u-qalmitaanka bukaannada ee barnaamijyada kaalmada gobolka, federaalka ama deegaanka, oo ay ku jirto kaalmada dhaqaale ee isbitaalka.
- Ka caawinta bukaannada codsashada caymiska caafimaadka iyo barnaamijyada kaalmada dhaqaale ee ay taageeraan federaalka ama gobolka
- Ka wada hadalka su'aal kasta oo dhaqaale
- Dejinta heshiisyada lacag-bixinta

- Bixinta qiyaasaha qiimaha
- Bukaannada oo la siiyo biil faahfaahsan marka ay codsadaan

F. CMH waxay ku tiirsanaan kartaa xog laga helay ilo kale si loo go'aamiyo in qofku u qalmo kaalmada.

II. TALLAABOOYINKA SIYAASADDA KAALMADA DHAQAALE LOOGU FAAFINAYO BULSHADA

CMH iyo ururrada xubnaha ka ah waxay u hoggaansami doonaan dhammaan sharciyada, xeerarka iyo qawaaniinta khuseeya ogeysiinta bukaannada ee kaalmada dhaqaale, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:

A. Calaamado iyo ogeysiisyo shaqsiyeed oo ka warbixinaya helitaanka kaalmada dhaqaale ayaa lagu dhejiyaa meelaha dadweynaha ee muhiimka ah ee isbitaalka, oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn: Diiwaangelinta Dhexe/Helitaanka Bukaanka, goobta sugitaanka Qolka Gurmadka, xarumaha caafimaadka, qolalka sugitaanka goobaha dhakhaatiirta isbitaalku shaqaalaysiiyo, goobaha la-taliyeyaasha dhaqaalaha iyo Xafiiska Ganacsiga.

B. Nuqullo daabacan oo Siyaasaddan, Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo soo koobidda ku qoran luqad fudud ayaa laga heli doonaa goobaha lagu xusay Qaybta A ee kore, waxaana bukaannada loo soo bandhigi doonaa xilliga qaabilaadda ama ka saarista isbitaalka.

C. Macluumaad, sida buug-yaraha, waxaa lagu dari doonaa galalka adeegyada/macluumaadka bukaanka iyo/ama goobaha diiwaangelinta bukaanka, waxaana lagu heli karaa codsi telefoon, internet ama fool-ka-fool ah.

D. Dhammaan biilasha waxaa lagu dari doonaa ogeysiis si cad u muuqda oo ku saabsan helitaanka kaalmada dhaqaale, oo ay ku jiraan lambarka telefoonka xafiiska ama waaxda isbitaalka ee bixin karta macluumaadka Siyaasaddan iyo habka Codsiga Kaalmada Dhaqaale, iyo cinwaanka internetka ee laga heli karo nuqullada Siyaasaddan, Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo soo koobidda luqadda fudud.

E. Dhammaan macluumaadka iyo/ama foomamka dadweynaha ee ku saabsan bixinta kaalmada dhaqaale, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, Siyaasaddan, Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo soo koobidda luqadda fudud ee Siyaasaddan, waxay adeegsan doonaan luqado ku habboon aagga ay xaruntu u adeegto, iyadoo la raacayo Qaybta 1557 ee Xeerka Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka La Awoodi Karo. CMH waxay bixin doontaa foomka codsiga daryeelka samafalka iyo soo koobiddiisa oo loo turjumay luqad kasta oo ay ku hadlaan 5% dadka gobolka ama 1,000 qof oo gobolka jooga, hadba inta yar; sidoo kale luqad kasta oo dheeraad ah oo ay ku hadlaan 5% bulshada uu isbitaalku u adeego ama 1,000 qof oo bulshadaas ka mid ah, hadba inta yar.

F. Codsiga Kaalmada Dhaqaale, tilmaamaha iyo soo koobidda luqadda fudud waxaa laga heli karaa https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/

G. CMH waxay samayn doontaa dadaal macquul ah oo ay qofka af ahaan ugu wargeliso Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee isbitaalka iyo sida uu caawimaad uga heli karo habka Codsiga Kaalmada Dhaqaale ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aan qofkaas laga qaadin tallaabooyinka ururinta deynta ee aan caadiga ahayn (ECAs).

H. Haddii wakhti kasta oo Muddada Codsiga ah bukaanku sheego inuusan awoodin inuu bixiyo, waxaa loo sheegi doonaa in kaalmo dhaqaale la heli karo, waxaana la siin doonaa Codsiga Kaalmada Dhaqaale. Codsiga iyo tilmaamihiisa waxaa laga heli karaa https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/

III. HABKA LOO CODSADO KAALMADA DHAQAALE

Bukaanku waa inuu helo oo buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee qoran, kuna lifaaqo dhammaan xogta/dukumentiyada taageeraya ee looga baahan yahay xaqiijinta u-qalmitaanka. Noocyada xogta/dukumentiyada loo baahan yahay waxaa lagu taxay tilmaamaha Codsiga Kaalmada Dhaqaale.

A. Shuruudaha Guud ee Codsiga

CMH waa inay samayso dadaallo macquul ah oo lagu aqoonsanayo bukaannada laga yaabo inay u qalmaan kaalmo dhaqaale, waana inay ka caawiso buuxinta codsiga marka ay codsadaan. Bukaannadu waxay codsan karaan kaalmo dhaqaale wakhti kasta oo Muddada Codsiga ee khusaysa ah.

CMH waxay codsan doontaa oo keliya dukumentiyada si macquul ah lagama maarmaanka ugu ah go'aaminta u-qalmitaanka sida Siyaasaddani dhigto. CMH ma dalban doonto in foomamka codsiga ama dukumentiyada taageeraya nootaayo lagu xaqiijiyo.

B. Wakhtiyada Maareynta Codsiga

CMH waxay raacdaa dhammaan waqtiyada khuseeya dib-u-eegista iyo go'aaminta ee uu sharciga Maine farayo, oo ay ku jiraan 22 M.R.S. §1716-A, oo dhaqan galay Luulyo 1, 2026.

C. U-qalmitaan Hore Loo Maleeyo: Waa go'aan lagu qiyaasayo in bukaanku u qalmo kaalmo dhaqaale iyadoo lagu salaynayo xaaladdiisa dhaqaale iyo xogtiisa hore. Go'aanka kama dambaysta ah waxaa la gaari doonaa ka dib buuxinta iyo dib-u-eegista codsiga kaalmada dhaqaale. Shuruudaha:

- Qofku wuxuu u qalmaa barnaamijyo gaar ah oo gobolka ah, tusaale SNAP ama TANF;
- Qofku hadda wuxuu u qalmaa Medicaid, balse ma uusan u qalmin taariikhda adeegga;
- Qofku waa hoy-la'aan;
- Qofku waa dhintay mana jirto hanti dhaxal ah oo la og yahay oo bixin karta deynta isbitaalka;
- Gobolku wuxuu qofka u aqoonsaday inuu u qalmo kaalmo sida ku cad Xeerka Magdhowga Dhibbanayaasha Dembiyada Rabshadaha wata ama Xeerka Magdhowga Dhibbanayaasha Xadgudubka Galmada.

D. Codsiga Kaalmada Dhaqaale wuxuu noqon doonaa diiwaanka muujinaya in kaalmada dhaqaale la oggolaaday ama la diiday.

E. Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee ay oggolaatay hay'ad kasta oo CMH ah waxaa loo adeegsan doonaa in si hordhac ah loogu aqoonsado u-qalmitaanka muddo lix bilood ah laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha, marka laga reebo haddii mid ka mid ah arrimahan soo socda dhaco:

- Adeegyo bukaan-jiif oo dambe la bixiyo;
- Dakhliga oo isbeddela;
- Tirada xubnaha qoyska oo isbeddasha;
- Xaaladda shaqada oo isbeddasha

F. Dadku waxay la xiriiri karaan isbitaal kasta oo CMH ah si ay macluumaad dheeraad ah uga helaan habka Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo caawimaadda buuxinta codsiga. Bukaannada doonaya Daryeel Caafimaad oo Degdeg ah: Isbitaallada CMH waxay si aan takoor lahayn u daryeeli doonaan dadka qaba xaaladaha caafimaad ee degdegga ah (sida lagu qeexay Qaybta 1867 ee Xeerka Sugnaanta Bulshada (42 U.S.C. 1395dd)), iyadoo aan loo eegin u-qalmitaankooda kaalmada ee Siyaasaddan, sida uu dalbanayo Xeerka Daaweynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Foosha Firfircoon ("EMTALA"). Isbitaallada CMH ma samayn doonaan wax dadka ka niyad-jebinaya inay raadsadaan daryeel caafimaad oo degdeg ah, sida inay bukaan ka dalbadaan lacag ka hor daaweynta xaalad degdeg ah ama inay oggolaadaan hawlaha ururinta deynta ee carqaladaynaya bixinta daryeelka degdegga ah ee aan takoorka lahayn.

IV. TALLAABOOYINKA URURINTA DEYNTA EE AAN CAADIGA AHAYN (ECAs)

A. Shuruudaha guud ee ka horreeya bilaabidda ECAs: Isbitaallada CMH ma bilaabi karaan ECA ilaa ay ka soo wareegaan ugu yaraan 120 maalmood taariikhda uu isbitaalka CMH bixiyey biilka koowaad ee daryeelka ee ka dambeeya bixitaanka bukaanka, isla markaana qofka la ogeysiiyey FAP. Intaas waxaa dheer, ka hor inta aan qofka laga qaadin ECAs, isbitaallada CMH waa inay sameeyaan dadaallo macquul ah oo lagu go'aaminayo inuu qofku u qalmo kaalmada dhaqaale ee FAP, si waafaqsan Qaybta 1 ee hoose. ECAs lama qaadi karo haddii bukaanku isbitaalka la sameeyey heshiis lacag-bixin oo lagu qanci karo. Ugu dambayn, ka hor bilaabidda ECA kasta, Madaxa Maaliyadda (CFO) ama qofka uu wakiishay waa inuu xaqiijiyaa in isbitaalku sameeyey

dadaallo macquul ah oo lagu go'aaminayo u-qalmitaanka FAP ee qofka, isla markaana uu Siyaasaddan u hoggaansamay. ECA lama bilaabi karo ka hor go'aankaas CFO ama wakiilkiisa.

B. Dadaallada macquulka ah: Isbitaal CMH ah waxaa loo aqoonsanayaa inuu sameeyey dadaallo macquul ah oo lagu go'aaminayo in qofku u qalmo kaalmada dhaqaale ee FAP haddii isbitaalku: (i) go'aamiyo in qofku buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka la sii qiyaasay; ama (ii) qofka siiyo ogeysiis ku filan oo ku saabsan FAP, isla markaana uu ka shaqeeyo codsi kasta oo FAP ah oo qofku soo gudbiyo (ha ahaado mid dhammaystiran ama aan dhammaystirnayn).

- Si loo go'aamiyo u-qalmitaan hore loo maleeyo, isbitaalku waa inuu caddeeyaa in qofku u qalmo kaalmada dhaqaale isagoo adeegsanaya xog aan qofku soo gudbin ama go'aan hore oo ku saabsanaa u-qalmitaanka FAP.
- Si qofka loo siiyo ogeysiis ku filan oo ku saabsan FAP, isbitaallada CMH waa inay qofka ogeysiiyaan FAP ugu yaraan 30 maalmood ka hor bilaabidda hal ama dhowr ECA, iyagoo siinaya ogeysiis qoran oo sheegaya in kaalmo dhaqaale ay heli karaan dadka u qalma, qeexaya ECAs ay CMH doonayso inay lacagta ku ururiso, kana warbixinaya taariikhda kama dambaysta ah ee ECAs la bilaabi karo ka dib; taariikhdaasina kama horrayn karto 30 maalmood laga bilaabo marka ogeysiiska qoran la bixiyey.
- Ogeysiiska qoran ku lifaaq soo koobid luqad fudud ku qoran oo ku saabsan FAP.
- Samee dadaal macquul ah oo qofka af ahaan loogu wargelinayo FAP iyo sida uu caawimaad uga heli karo habraaca FAP.

C. Habraacyada dheeraadka ah haddii la soo gudbiyo codsi FAP oo aan dhammaystirnayn: Marka lagu daro raacidda shuruudaha ogeysiiska ee Qaybta A ee kore, isbitaallada CMH waa inay dadka Muddada Codsiga gudaheeda soo gudbiya codsi FAP oo aan dhammaystirnayn u sheegaan sida loo dhammaystiro, una siiyaan fursad macquul ah oo ay ku dhammaystiraan. Si shuruudahan loo buuxiyo, isbitaallada CMH waa inay sameeyaan dhammaan arrimahan:

- Ha bilaabin ECAs cusub, hana sii wadin ECAs hore loo bilaabay.
- Sii qofka ogeysiis qoran oo ay ku jiraan macluumaadkan: sharaxaad ku saabsan xogta iyo/ama dukumentiyada looga baahan yahay Siyaasadda FAP ama foomka codsiga FAP si codsiga loo dhammaystiro.
- Bixi macluumaadka xiriirka, oo ay ku jiraan lambarka telefoonka iyo goobta jireed, ee: (i) xafiiska ama waaxda isbitaalka ee bixin karta macluumaadka FAP; iyo (ii) midkood (a) xafiiska ama waaxda isbitaalka ee ka caawin karta habka codsiga FAP, ama (b) ugu yaraan hal urur aan faa'iido doon ahayn ama hay'ad dowladeed oo CMH u aqoonsatay il caawimaad oo la heli karo marka la codsanayo FAP.

D. Habraacyada dheeraadka ah haddii la soo gudbiyo codsi FAP oo dhammaystiran: Marka lagu daro raacidda shuruudaha ogeysiiska ee Qaybta A ee kore, isbitaallada CMH waa inay sameeyaan dhammaan arrimahan marka qofku soo gudbiyo codsi FAP oo dhammaystiran inta lagu jiro Muddada Codsiga:

- Ha bilaabin ECAs cusub, hana sii wadin ECAs hore loo bilaabay.
- Go'aami inuu qofku u qalmo kaalmada dhaqaale ee FAP.
- Qofka qoraal ugu ogeysii go'aanka u-qalmitaanka, oo ay ku jiraan nooca kaalmada uu u qalmo iyo sababta go'aanka.
- Haddii la go'aamiyo inuu qofku u qalmo kaalmada dhaqaale ee FAP, isbitaalka CMH waa inuu qaadaa dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee lagu burinayo ECA kasta oo qofka looga qaaday si lacagta daryeelka loo ururiyo (tusaale ahaan, baabi'inta xukun maxkamadeed, ka qaadidda xuquuq sheegasho ama xayiraad hanti, iyo ka saaridda xogta taban ee warbixinta deynta).

E. Deymaha loo gudbiyo hay'adaha ururinta deynta: Marka lagu daro shuruudaha guud ee ECAs ee Qaybta A ee kore, isbitaallada CMH waa inay buuxiyaan shuruudahan dheeraadka ah marka koonto loo gudbinayo hay'ad ururisa deynta:

- Isbitaallada CMH waxay hay'adaha ururinta deynta ka dalbanayaan dammaanad qoraal ah oo muujinaysa inay u hoggaansan yihiin Xeerka Habdhaqanka Caddaaladda ah ee Ururinta Deynta iyo Xeerarka Anshaxa iyo Mas'uuliyadda Xirfadeed ee American Collections Association (ACA).

F. Warbixin loo gudbiyo hay'adaha warbixinta deynta: Marka lagu daro shuruudaha guud ee ECAs ee Qaybta A ee kore, isbitaallada CMH waa inay buuxiyaan shuruudahan dheeraadka ah marka ay warbixin u gudbinayaan hay'ad kasta oo warbixinta deynta samaysa (tusaale, TransUnion, Experian iyo Equifax):

- Koontooyinka loo gudbiyey hay'ad ururisa deynta waxaa lagu soo sheegi karaa hay'ad qaran oo warbixinnada deynta samaysa haddii qofka mas'uulka ahi aanu deynta si buuxda u bixin ama aanu hay'adda ururinta deynta la samayn heshiis lacag-bixin oo lagu qanci karo.

V. BIILASHA IYO ILAALINTA BUKAANKA

A. Ogeysiiska Adeegyada Aan Kaalmadu Daboolin

CMH waa inay bukaanka loo go'aamiyey inuu u qalmo kaalmo dhaqaale u sheegtaa haddii qayb ka mid ah adeeg caafimaad, daaweyn, hawlgal, baaritaan ama adeeg kale oo isbitaalku bixiyo aanay ku jirin Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. Ogeysiiskaas waa in la bixiyo ka hor inta aan adeegga la fulin, mar kasta oo ay macquul ahaan suurtagal tahay, waana inuu si cad u sharaxaa adeegga aan la daboolin iyo masuuliyadda dhaqaale ee suurtagalka ah ee bukaanka.

B. Xaddidaadda Biilasha Adeegyada Aan Daboolnayn ee Aan Hore Loo Shaacin

Haddii CMH ku guuldarraysato inay hore u ogeysiiso in adeeg caafimaad, daaweyn, hawlgal, baaritaan ama adeeg kale oo isbitaalku bixiyo aanu ku jirin Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale,

CMH uma diri karto bukaanka biilka adeeggaas. Wax ku jira qaybtani kama mamnuucayo CMH inay adeegyadaas biil ugu dirto shirkadda caymiska caafimaadka ee bukaanka marka sharcigu si kale u oggol yahay.

VI. LIISKA BIXIYAYAASHA DARYEELKA DEGDEGGA AH AMA DARYEELKA KALE EE CAAFIMAAD AHAAN LAGAMA MAARMAANKA AH

Xiriiriyaha internetka ee Liiska Bixiyayaasha Kaalmada Dhaqaale ee CMH waxaa laga heli karaa:

https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/

Boggan waxaa ku qoran liiska adeeg-bixiyeyaasha isbitaallada CMH ee bixiya Daryeel Degdeg ah iyo/ama Daryeel Caafimaad ahaan Lagama Maarmaan ah ee AAN hoos iman Siyaasaddan. CMH si joogto ah ayay u cusboonaysiisaa liiska adeeg-bixiyeyaasha aan shaqaalaha u ahayn si xogtu u ahaato mid sax ah oo cusub. Hase yeeshee, mararka qaar liisku ma muujin karo adeeg-bixiye cusub ama isbeddel ku yimid xaaladda adeeg-bixiye ee ah in Siyaasaddani daboolayso iyo in kale. CMH waxay dadka kula talinaysaa inay, marka ay suurtagal tahay, la tashadaan la-taliye dhaqaale oo CMH ah si loo xaqiijiyo saxnaanta xogta ku saabsan adeeg-bixiye gaar ah.

VII. KORMEERKA IYO WARBIXINTA

A. Waa in la hayaa diiwaanka codsiyada kaalmada dhaqaale ee laga soo saari karo warbixinno xilliyo kala duwan, kana madax bannaan warbixinnada maaliyadeed ee kale ee loo baahan yahay.

B. Hawlaha kaalmada dhaqaale waxaa sanad kasta looga warbixin doonaa bulshada, iyadoo lagu salaynayo qiyaasta kharashka adeegyada.

TIXGELINNO GAAR AH:

I. XADDIDAADAHA:

A. Siyaasaddani waxay khusaysaa:

- Dadka deggan Maine ee hela daryeel degdeg ah iyo daryeel kale oo caafimaad ahaan lagama maarmaan ah sida uu adeeg-bixiyuhu ku go'aamiyo qiimayntiisa caafimaad, iyadoon loo eegin xaaladda dhaqaale ee bukaanka, isla markaana buuxiya shuruudaha hoos ku xusan
- Dadka aan degganayn Maine ee raadsada daryeel degdeg ah isla markaana buuxiya shuruudaha hoos ku xusan

B. Kaalmada dhaqaale ma:

- Bixiso caymis caafimaad
- Beddesho ama kabto caymiska caafimaadka
- Dammaanad-qaaddo faa'iidooyin
- Daboolo adeeg-bixiyeyaasha caafimaadka ee aan CMH ka tirsanayn
- Meesha ka saarto lacagaha ugu yar ee wada-bixinta ee ay xeerarku ama sababaha caafimaadku waajibinayaan (tusaale ahaan, barnaamijka faragelinta dadka rabshadaha sameeya ama barnaamijka daaweynta ku-tiirsanaanta maandooriyaha)
- Daboolo qalliin biliceed oo ikhtiyaari ah ama adeegyo aan buuxin shuruudaha lagama maarmaannimada caafimaad

II. U-QALMITAANKA KAALMADA DHAQAALE:

A. Kaalmada dhaqaale ee Daryeelka Caafimaad ahaan Lagama Maarmaanka ah waxaa heli kara dadka deggan Maine ee:

- Aan lahayn caymis caafimaad ama haysta caymis bixiya oo keliya qayb ka mid ah biilka; iyo
- Buuxiya shuruudaha dakhliga ee hoos ku xusan

B. Kaalmada dhaqaale ee Daryeelka Degdegga ah waxaa heli kara dadka deggan Maine iyo kuwa aan degganayn Maine ee:

- Aan lahayn caymis caafimaad ama haysta caymis bixiya oo keliya qayb ka mid ah biilka; iyo
- Buuxiya shuruudaha dakhliga ee hoos ku xusan

C. Isbitaallada CMH waxay bixiyaan 100% kaalmo dhaqaale (daryeel bilaash ah), iyadoo lagu salaynayo shuruudahan:

- Dakhliga guud waa ka yar yahay ama la mid yahay 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL)
- Bukaanku waa qof deggan Maine oo helaya adeegyo iyo agab daryeel degdeg ah ama caafimaad ahaan lagama maarmaan ah
- Bukaanku ma aha qof deggan Maine, wuxuuna helayaa Daryeel Degdeg ah
- Dhammaan ilaha lacag-bixinta dhinac saddexaad, oo ay ku jiraan kharashka loo baahan yahay in marka hore la bixiyo (spend down) marka ay khusayso, waa in laga faa'iidaystay ilaa dhammaad

D. Isbitaallada CMH waxay bixiyaan daryeel qayb ahaan bilaash ah (qaddarka daryeelka bilaashka ah ee qaybta ah wuxuu la mid noqonayaa 100% kharashyada u qalma oo laga jaray AGB, balse marnaba kama yaraan doono 55%).

- Dakhliga guud wuxuu ka badan yahay 200%, wuxuuna ka yar yahay ama la mid yahay 250% ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL)
- Bukaanku waa qof deggan Maine oo helaya adeegyo iyo agab daryeel degdeg ah ama caafimaad ahaan lagama maarmaan ah
- Bukaanku ma aha qof deggan Maine, wuxuuna helayaa Daryeel Degdeg ah
- Dhammaan ilaha lacag-bixinta dhinac saddexaad, oo ay ku jiraan spend down marka ay khusayso, waa in laga faa'iidaystay ilaa dhammaad

E. Isbitaallada CMH waxay bixiyaan qorshayaal lacag-bixin oo aan ka badnayn 4% Dakhliga Guud ee La Hagaajiyey ee Wax-ka-beddelka Lagu Sameeyey (MAGI), codsadayaasha uu MAGI-goodu ka hooseeyo 400% Heerka Saboolnimada Federaalka.

F. Qofna oo u qalma kaalmo dhaqaale lagama qaadi doono kharash ka badan AGB-ga la xisaabiyey ee Daryeelka Degdegga ah ama daryeelka kale ee Caafimaad ahaan Lagama Maarmaanka ah.

Haddii aad su'aalo ka qabto Kaalmada Dhaqaale ee Central Maine Healthcare, fadlan la xiriir

(207) 786-1803 ama booqo bogga internetka

https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/

QEEXITAANNO

Qaddarka Guud ahaan la Biilo (AGB): Qaddarrada guud ahaan laga biilo daryeel degdeg ah ama daryeel kale oo caafimaad
ahaan lagama maarmaan ah ee la siiyo dadka leh caymis daboolaya daryeelkaas. Marka ay khusayso, AGB waxaa lagu go'aaminayaa "habka dib-u-eegista hore" iyadoo la isku darayo dhammaan lacagihii uu isbitaalku ka helay qorshayaasha ganacsiga iyo Medicare sannad-maaliyadeedkii hore, ka dibna loo qaybinayo wadarta kharashyada uu isbitaalku ku soo dallacay qorshayaashaas ganacsi iyo Medicare sannadkaas hore.
Bukaannada u qalma kaalmada waxay heli doonaan qiimo-dhimis la mid ah ama ka badan qiimo-dhimista la siiyo dadka caymiska leh.
Boqolleyda AGB ee hoos ku qoran waxay khusaysaa daryeel kasta oo degdeg ah ama daryeel kale oo caafimaad ahaan lagama maarmaan ah oo la siiyo qof u qalma FAP laga bilaabo taariikhda la ansixiyey Siyaasaddan.

Isbitaallada xubnaha ka ah	Central Maine Medical Center	Rumford Hospital	Bridgton Hospital
AGB %	45.0%	51.2%	50.3%
Qiimo-dhimista % loo baahan yahay	55.0%	48.8%	49.7%
Qiimo-dhimista % la bixiyo *	55.0%	55.0%	55.0%
Is-bixinta tooska ah	**Heerka Medicare**	**Heerka Medicare**	**Heerka Medicare**

Muddada Codsiga: Muddada lagu codsan karo Kaalmada Dhaqaale ee adeeg gaar ah waxay dhammaanaysaa 240 maalmood ka dib biilka ugu horreeya ee la bixiyo marka bukaanku isbitaalka ka baxo. Kaalmada dhaqaale ee lagu oggolaaday codsigaas waxay adeegyada bukaan-socodka u shaqaynaysaa muddo 180 maalmood ah oo ka bilaabmaysa taariikhda go'aanka. Adeegyada bukaan-jiifka ee la bixiyo ka dib taariikhda go'aanka hore waxay u baahan yihiin codsi la cusboonaysiiyey.

Tallaabooyinka Ururinta Deynta ee Aan Caadiga Ahayn (ECAs): Waa tallaabooyin uu isbitaal aan faa'iido doon ahayn ku qaado qof si uu u helo lacagta adeegyada ama agabka daryeelka caafimaad ee isbitaalku bixiyey. Ka hor inta aanu qaadin tallaabooyinkan, isbitaalku waa inuu sameeyo dadaallo macquul ah oo lagu go'aaminayo in qofku u qalmo kaalmada dhaqaale (26 U.S.C. § 501(r)(6)).

ECAs kuma jiraan in isbitaalku xaq sheegasho deyn (lien) ku yeesho hantida bukaanka si uu u helo lacagta ka soo baxda heshiis, xukun ama isu-tanaasul la xiriira dacwad uu bukaanku ka gudbiyey dhinac saddexaad oo dhaawaciisa sababay.

ECAs sidoo kale kuma jiraan in isbitaalku deynta qofka ka iibiyo cid kale haddii, ka hor iibka, isbitaalku heshiis qoran oo sharci ahaan waajib ah la galo qofka deynta iibsanaya, kaas oo ka kooban afar shuruudood:

- Qofka deynta iibsanaya waa inuu oggolaadaa inuusan adeegsan wax ECAs ah si uu deynta u ururiyo;
- Qofka deynta iibsanaya waa inuu oggolaadaa inuusan deynta ku soo rogin dulsaar ka badan heerka dhaqan galka ah ee Qaybta 6621(a)(2) ee Xeerka Dakhliga Gudaha marka deynta la iibinayo (ama heer kale oo dulsaar ah oo lagu dejiyey ogeysiis ama hagitaan kale oo lagu daabacay Internal Revenue Bulletin);
- Deyntu waa inay noqotaa mid isbitaalku soo ceshan karo ama dib ugu yeeri karo marka isbitaalka ama iibsaduhu go'aamiyo in qofku u qalmo FAP; iyo
- Haddii la go'aamiyo in qofku u qalmo FAP oo deyntii aan dib loogu celin ama aan isbitaalku dib u soo ceshan, iibsaduhu waa inuu raacaa habraacyada heshiiska ku qeexan ee xaqiijinaya in qofku aanu bixin, waajibna aanu ku ahayn inuu iibsadaha iyo isbitaalka wadajir uga bixiyo wax ka badan qaddarka shaqsi ahaan looga baahan yahay qof u qalma FAP. ECAs sidoo kale kuma jiraan gudbinta sheegasho deyn ee dacwad musalafnimo.

Qalliinka Bilicda ee Ikhtiyaariga ah: Buugga CMS Medicare ee Isbitaallada, Qaybta 250.11. Qalliinka bilicdu wuxuu ka kooban yahay qalliin kasta oo loogu talagalay hagaajinta muuqaalka, marka laga reebo marka loo baahdo dayactir degdeg ah (sida ugu dhakhsaha badan ee caafimaad ahaan suurtagalka ah) ee dhaawac shil ka dhashay ama hagaajinta shaqada xubin jirka ka mid ah oo qaab-dhismeedkeedu khaldan yahay.

Daryeelka Degdegga ah:

- Qof jooga Waaxda Gurmadka ("ED") oo codsada baaritaan ama daaweyn xaalad caafimaad kasta; ama
- Bukaanka oo lagu daaweeyo waax ama goob adeeg oo dadweynaha loogu sheegay (magac, calaamado dhejisan, xayeysiis ama hab kale) inay bixiso daryeel degdeg ah oo xaalado caafimaad oo degdeg ah, iyada oo aan loo baahnayn ballan hore (tusaale, xarun daryeel degdeg ah, qaybta Foosha iyo Dhalmada ee ka baxsan dhismaha weyn, iwm.).

Qoyska: "Dakhliga qoyska" waxaa loola jeedaa isu-geynta dakhliga bukaanka iyo qoyskiisa. "Dakhliga qoyska" kuma jiro dakhliga qof kasta oo la deggan bukaanka balse aan xubin ka ahayn qoyskiisa. Qaybtan dhexdeeda, "qoys" waxaa loola jeedaa koox ka kooban laba qof ama ka badan oo ay dhalasho, guur ama korsasho isku xireen, wada deggan, isla markaana uu ka dhexeeyo waajib sharci oo is-taageerid ah. Dhammaan dadkaas qaraabada ah waxaa loo tixgeliyaa hal qoys.

Dakhliga Qoyska

Waxa ku jira:

- Mushaharka iyo gunnooyinka guud ka hor wax kasta oo laga jaro
- Dakhliga saafiga ah ee shaqo-iskii-u-shaqaysi aan beer ahayn ama beer ah (dakhliga ka soo gala ganacsi uu qofku leeyahay ama beer uu leeyahay ama kiraystay, ka dib marka laga jaro kharashaadka ganacsiga ama beerta)
- Lacagaha joogtada ah ee Sugnaanta Bulshada, hawlgabka tareennada, magdhowga shaqo-la'aanta, magdhowga shaqaalaha, gunnada shaqo-joojinta ee sanduuqyada ururrada shaqaalaha iyo gunnooyinka askartii hore
- Kaalmada dadweynaha, oo ay ku jiraan lacagaha Temporary Assistance to Needy Families (TANF) iyo General Assistance
- Gunnooyinka tababarka
- Masruufka carruurta, qoondaynta qoysaska ciidamada ama taageerada kale ee joogtada ah ee laga helo xubin qoys oo maqan ama qof aan guriga la degganayn
- Hawlgabyada gaarka loo leeyahay, hawlgabyada shaqaalaha dowladda iyo lacagaha joogtada ah ee caymiska ama gunnada sannadlaha ah (annuity)

- Saamiyada faa'iidada, dulsaarka, kirada, xuquuqda isticmaalka (royalties) ama lacagaha xilliyeed ee laga helo hanti-dhaxal ama ammaano (trusts)
- Guulaha saafiga ah ee khamaarka ama bakhtiyaa-nasiibka

Kuma jiraan:

- Faa'iidooyinka raasamaalka (capital gains)
- Hantida dareeraha ah ee si fudud lacag loogu beddeli karo, oo ay ku jiraan lacagaha bangiga lagala baxo ama lacagta iibinta hanti
- Lacag-celinta canshuuraha
- Hadiyadaha, amaahda iyo dhaxalka hal mar la helo
- Lacag caymis oo hal mar la bixiyo ama magdhow kale oo hal mar ah oo dhaawac la xiriira
- Faa'iidooyinka aan lacag caddaan ahayn, sida qaybta caymiska caafimaadka ee loo-shaqeeyaha ama ururka shaqaaluhu bixiyo ama faa'iidooyinka kale ee shaqaalaha
- Qiimaha cuntada iyo shidaalka laga soo saaro laguna isticmaalo beeraha iyo qiimaha kirada la qiyaaso ee guryaha uu milkiiluhu deggan yahay, ha ku yaallaan beer ama meel aan beer ahayn
- Barnaamijyada federaalka ee bixiya faa'iidooyin aan lacag caddaan ahayn, oo ay ku jiraan Medicare, Medicaid, Food Stamps, qadada dugsiyada, iyo kaalmada qoraalka asalka ah loogu yeeray "focusing assistance"

Qofka U Qalma FAP: Qof u qalma kaalmo dhaqaale sida ku cad FAP (iyadoon loo eegin inuu codsaday iyo in kale).
Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL): Tilmaamaha dakhliga saboolnimada federaalka ee ay dejiso Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka laguna daabaco Diiwaanka Federaalka (Federal Register).

Codsiga Kaalmada Dhaqaale: Codsi loo buuxiyey si waafaqsan habraaca Qaybta III ee Siyaasaddan.

Kharashyada Guud: Qiimaha buuxa ee isbitaalku u dejiyey daryeelka caafimaadka, kaas oo si joogto ah oo isku mid ah looga qaado bukaannada ka hor inta aan la xisaabin dhimista heshiisyada, qiimo-dhimisyada ama jaritaannada.

Daryeelka Caafimaad ahaan Lagama Maarmaanka ah: Adeegyo caafimaad ama agab:

- Oo uu dhakhtar amro, kuna habboon oo lagama maarmaan u ah calaamadaha, ogaanshaha cudurka ama daaweynta xaalad caafimaad ama caafimaad maskaxeed, oo ay ku jiraan adeegyo ka-hortag gaar ah
- Oo loo bixiyo ogaanshaha ama daryeelka iyo daaweynta tooska ah ee xaalad caafimaad ama caafimaad maskaxeed;

- Oo buuxiya heerarka habdhaqanka caafimaad ee wanaagsan ee bulshada caafimaadka iyo caafimaadka maskaxda ee aagga adeegga;
- Oo aan inta badan loogu talagelin raaxada bukaanka ama adeeg-bixiyaha; iyo
- Oo ah heerka ama qaddarka adeegga ugu habboon ee si ammaan ah loo bixin karo ama, marka loo baahdo, lagu go'aamiyo dib-u-eegista habka isticmaalka adeegyada

Guri ay Deggan Yihiin Qoysas Badan: Haddii guri ay ku jiraan wax ka badan hal qoys iyo/ama wax ka badan hal qof oo aan qaraabo ahayn, tilmaamaha dakhliga waxaa si gaar ah loogu dabaqayaa qoys kasta iyo/ama qof kasta oo aan qaraabo ahayn, ee laguma dabaqayo guriga oo dhan.

Deggane:
"Deggane gobolka" waxaa loola jeedaa qof:

(1) Ku nool Gobolka isaga oo damacsan inuu halkaas ku nagaado muddo aan xadidnayn.

(2) Gobolka u yimaada isagoo leh shaqo joogto ah, ku meel gaar ah, xilliyeed ama ballanqaad shaqo oo kale, ama shaqo raadinaya.

"Deggane gobolka" kuma jiro qof si ku meel gaar ah ugu sugan Gobolka dalxiis ama booqasho.

BAYAANNADA MAS'UULIYADDA KA-REEBISTA
Xaalado gaar ah oo adag ayaa keeni kara in laga leexdo qodobbada Siyaasadda. Waxaa la fahamsan yahay in xaalado degdeg ah ay dhici karaan oo u baahan xal degdeg ah. Marka ay khusayso, waa in la diyaariyaa dukumenti ku habboon oo taageeraya sababta ka-leexashadaas loogu baahday.

TIXRAACYADA ISKU XIRAN
Siyaasadda Biilasha iyo Ururinta Deynta ee Central Maine Healthcare

TIXRAACYADA IYO ILAHA CADDEYNTA
Shuruudaha Isbitaallada 501(c)(3) ee hoos yimaada Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo – Qaybta 501(r). (taariikh la'aan). La soo helay Diseembar 16, 2019, laga soo xigtay https://www.irs.gov/charities-non-profits/charitable-organizations/requirements-for-501c3-hospitals-under-the-affordable-care-act-section-501r.

Xeerarka Dib Loo Habeeyey ee Maine, Cinwaanka 24-A, Xeerka Caymiska Maine, sida wax looga beddelay. Siyaasadaha iyo habraacyada waxaa loo maamuli doonaa si waafaqsan dhammaan qodobbada khuseeya ee Xeerarka Dib Loo Habeeyey ee Maine, Cinwaanka 24-A, iyo xeerarka gobolka ee la xiriira.

SOO KOOBIDDA DIB-U-EEGISTA/ANSIXINTA

Dhammaan siyaasadaha rasmiga ah ee Central Maine Healthcare waxaa lagu kaydiyaa hab elektaroonig ah, waana la beddeli karaa. Siyaasad la daabacay looma qaadan karo siyaasadda rasmiga ah haddii aanay waafaqsanayn nooca hadda si elektaroonig ah loo kaydiyo.

BEDELAYA: Ma jiro
TAARIIKHAHA DIB-U-EEGISTA/WAX-KA-BEDDELKA 11/20/2020, (02/04/2022), 08/23/2023, 10/22/2025, 7/30/2026
ANSIXIYEYAASHA: Guddiga Maaliyadda